# KU RAAXAYSIGA HOYGA



sato

sato

# KU SOODHAWOW HOYGA KIRADA AH EE SATO

**Tusmadan qoraaalka waxaad ka heleysaa macluumaad ku saabsan arrimaha la xiriira hoygaagan cusub ee kirada ah; xogo, talo iyo tusmooyin muhiima iyo niddaamka. Dulmar oo rog-rog dabadeena aqri, sidoo kalena meel kuwada xifdi heshiiska kirada guriga iyo waraaqaha kalee muhiimka ah.**

**Ka aqirso internetka ciiwaanka sato.fi. waxaad ka heleysaa macluumaadkii u danbeeyey ee hoygaaga!**

**Tusmada**


1. Su'aalaha inta badan iswaydiiyaan dadka guriga u soo guuraya .................... 3
2. Ku noolaanshaha ABC .................... 5
3. Xeerka guud ee loosiman yahay .................... 9
4. Daryeelka wanaagsan ee hoyga .................... 11
    4.1. Neecaaw wanaagsan gudaha .................... 11
    4.2. Nadiifinta guriga .................... 11
    4.3. Diirnaansha / Hiidka .................... 14
    4.4. Biyaha iyo baulaacada .................... 15
    4.5. Maareynta khashinka .................... 16
5. Amniga hoyga .................... 18
    5.1. Caymiska guriga .................... 18
    5.2. Ka hortagga .................... 18
6. Ka guurista guryaha SATO .................... 21

Liite 1, Xeerarka guud iyo qawaaniinta dhismaayasha SATO .................... 23

Lifaaqa 2, Shaxda qaybsiga masuuliyadda ee guryaha kirada ah ee SATO ...... 25


**Adeega macaamiisha SATO**

Tel. 020 334 443
Xiliga ay furan tahay isniin–Khamiis saacad 8-17 Jimacaha saacada 9-16

**Waxaad sidoo kale adeeg macmiil hufan oo dhaqso ah ka heleysaa qoraal kula sheekeysiga sato.fi: palveluchatti isniin – khamiis saacada 10–20 iyo jimcaha saacada 9–18.**

**Ka dhigo OmaSATO qeyb kamid ah noloshaada: oma.sato.fi**

OmaSATO waxaad ku sameyn kartaa sida:

- inaad ka xaqiiqsato heshiiskaaga
- ku wargeliso ciladaha
- ka aqristo wixii wargelin dhismahiina
- inaad qabaar uga soo dirto adeega macaamiisheena

# 1. SU'AALAHA INTA BADAN ISWAYDIIYAAN DADKA GURIGA U SOO GUURAYA

**Goorman soo doonnan karaa furayaasha?**

Waxaad ka heleysaa furrayaashaada shirkada dayactirka 12:00 -ka duhurnimo kadib, maalinta heshiiskaagu billaabanayo. Haddii maalintaasi tahay maalin Sabti ama Axad ah ama fasax ah, waxaad heli doontaa furayaasha maalinta shaqo ee xigta 12:00-ka duhurnimo kadib.

Marnaba furraha toos ha uga qaadan ruuxii horey u deganaa guriga hana siin qolada dabadaa soo degeysa. Sababtoo ah shirkada dayactirku wey u diiwaan gashan yihiin furayaasha wixii maqan si ay kharashkeeda ugu dalacdaan.

Marka aad furayaasha qaadanayso, fadlan soo qaado:
- aqoonsigaaga rasmiga ah (sida liisan baabuur-wadis ama baasaaboor);
- heshiiska guriga oo saxeexan;
- rasiidka lacagta deebaajiga/daboosiga.

Haddii aad qaab elektaroonik u saxiixdey heshiiskii guriga, waxaad heshiiska ka tusi kartaa teleefonkaaga heshiiska tusaale markaad furaha soo doonaneyso.

**Ma khasab baa inaan samaysto heshiiska caymiska hoyga?**

Haa sida waafaqsan heshiiska guriga, waa inaad leedahay caymis hoy oo dhammaystiran, kaasi oo ay kamid yihiin caymiska guriga iyo masuuliyadda guud. Caymiska hoyga wuxuu kuu ceyminayaa hoygaaga waxyeeladii ku timaada, taasoo laga yaabo waxyeelada gaarta deriskaagana inuu bixiyo ceymiskaagu. Waxaad ka samaysan kartaa heshiiska shirkadda caymiska ee aad doonto.

**Korontadu ma kujirtaa kirada?**

Maya, haddaan si gaar ah loogu xusin heshiiska guriga. Waa inaad la gasho heshiis koronto shirkadda korontada ee aad doonto, kahor intaanad soo guurin si korontadu kuugu billaabato maalinta aad soo guurto una hesho ileys iyo talaakad shaqeyneysa.


**Biyuhu ma kujiraan kirada?**

Maya biyuhu kuma jiraan, haddaan markaa si gaara loogu xusin heshiiska kirada. Kharashka biyahana waxaad ka xaqiiqsan kartaa heshiiska kirada guriga.

**Qadka internetka ma kirada guriga ku jiraa?**

Inta baddan dhismooyinka cusub hoygaaga waxaa ku diyaarsan qadka internetka eeTelia. Macaamiisha degan SATO waxaa u lacaga la'aan ah xawaare net oo aasaasiya, haddii aad rabto xawaare xowli internet ah waxaad ka heleysaa Telia qiimo ku raaligelinaya. Waxaanad qadka netka ku heleysaa adigoo la xiriira Telia adeega macaamiisha.

Dhamaan dhismayaasha kirada ee SATO ma wada laha internetka lacag la'aanta. Waxaad ka xaqiiqsan kartaa dhismaha aad ku nooshahay inuu leeyahay boga sato.fi ama adeegga macaamiisha ee Telia.



### Xageen ka sameeyaa wargelinta geediga?

Boostada ka samee heshiiska bedelashada ciiwaanka iyo in dib boostadaada laguugu soo diro. Boostadaada waxaa laguugu soo hagaajin muddo bil ah ciiwaankaaga cusub. Xafiisyada dowlada inta badan waxay si toosa uga ogaanayaa xarunta tirokoobka bulsdhada dhigitalka, laakiin waa inaad sameysaa wargelinta badelashada ciiwaanka boostada si aad u hesho boostooyinka kaaga imaanaya sida jaraa'ihdyada, bankiyada, caymiska, jaaliyadaha, hay'ada, (meelaha aad rukunka ka tahay) iwm.

### Xageen ka sameeyaa bedelashada ciiwaanka?

Lagal heshiis inuu ciiwaankaagu is badeley rabtidana in boostada laguugu soo diro ciiwaankan cusub boostada, waxayna muddo bil ah kuugu soo wareejineysaa boostooyinkii si lacag la'aan ah. Masuuliyiin badan waxay ka helayaan ciiwaankaaga cusub si toos ah waaxda diiwaangelinta , laakiin ogeysii ciiwaankaaga cusub haddii uu kuu dalbanaa wargeyso, bankiga, shirkada ceymiska , dukaamada aad ku leedahay kaarka macmiilnimada, hay'adaha iyo ururada iwm.

### Sideen ku helaa in magaca albaabka leygugu qoro?

La soo xiriir adeega macmiilka ee SATO, markii aad rabto magaca in laguugu qoro liiska sabuurada magacyada dadka kunool dhismaha iyo kan albaabkaaga.

### Sigaar ma lagu cabi karaa hoygeyga?

Maya sida ay dhigayaan shuruudaha iyo xaaladaha heshiiska gurigu, sigaar-cabbistu waa ka mamnuuc gurigaaga cusub. Fadlan ogow in dhammaan meelaha la wadaago ee dhismahaagu ay sidoo kale yihiin meelo aan sigaar lagu cabbi karin. Goobaha sigaarka lagu cabo iyo balakoonka adigoo ka taxadaraya inuusan deriskaaga qiiqa sigaarka uga gudbeyn daaqadaha iyo balakoonkoodaba. Dhismaha SATO ee ka reeban sigaar cabista, xitaa balakoonkooda iyo bannaankooda laguma cabi karo sigaar.

### Halkee ayaan dhigi karaa baabuurkayga?

Waxaad ka qabsan kartaa baarkin kuu gaar ah shirkadda dayactirka ama shirkada ganaaxa baarkimada. Qiimaha barkinka hadba wuxuu ku xiran tahay inuu leeyahay bareeska kululeysada ama uusan laheyn barees. Mararka qaar waxaa dhacda ciriiri inaan baarkin jirin baahidoo badan darteed, inaad heshona aad saf u galeyso. Barxadaha baarkinka ee booqdayaasha waxa kaliya loogu talogalay martida ku soo booqata ee wakhtiga yar joogaya. Ogsoonow in dhigashada gaariga meesha qaldan ay ganaaxayaan shirkada ganaaxa heeganka ah. Waxaa khasab ah marnaba xiitaa muddo gaaban in aanad dhigin baabuurkaaga dhabbaha gaddiidka gurmadku maro. Dhabbaha gaaddiidka gurmadku maro waxa lagu sameeyaa calaamado.

### Xageen caawimo iyo xog dheeriya ka heli karaa?

Hoyga ama dhismaha aad ku nooshahay goobaha dadka ka dhexeeya cilidaha ka jira waxaa kaa caawinaya shirkada dayactirka ama qeybaha dhismooyinka SATOn talomestari. Haddii dhismihiinu leeyahay dayactire u gaara waxaad ka heleysaa xogtiisa OmaSATO ama inaad la soo xiriirto adeega macaamiisha. Dayactiraha gaarka dhismihiina howshiisa waxaa ka mid ah sida: wargelinta cilidaha wax ka qabadka u baahan iyo waxyaabaha dayactirka yaryar ee gudaha hoyga. Dayactiraha gaarka ee dhismaha howlaha uu u qaabilsan yahay masuuliyada shirkada dayactirka arrimaha furayaasha, wiikendhiga iyo habeenadii, mashiinada iyo shaqooyinka bannaanka dhismaha iyo nadaafada.

Maamulaha adeega SATO ayaa kaa caawinaya wada shaqeynta dadka kunool dhismaha, derisnimida, niddaamka ama sharuucda dhismaha arrimaha la xiriira. Haddii aad u baahan tahay latashi bixinta kharashka kirada waxaad la xiriirtaa adeega macmiisha ee Ropo Capitalin. Adeega macaamiisha SATO waxay qaabilsan yihiin wixii su'aalo ee la xiriira heshiiska kireynta guriga.

Waxaad heli doontaa tafaasiisha la-xidhiidhka, foomam iyo macluumaad waxaanad ka heleysaa sato.fi sidoo kale xasuuso inaad booqato bogga OmaSATO ood ka heleyso ciiwanka sato.fi/omasato.

### Xageen ka helayaa caawinaad haddii hoygeyga cilad ama wax ka maqan jiraan?

Dayactir degdega wixii u baahan soo wac markiiba shirkada dayactirka qaabilsan guriga ama u qaabilsanaha dhanka dayctirka adeega macaamiisha ee SATO. Warbixinta xogta waxaad ka heleysaa OmaSATOsta, sato.fi beejkaas ama dhismaha aad degan tahay sabuurada ogeysiiska. Xiliga heeganka ciladaha degdeg lagu wargelinayo waa inaad ku wargelisaa shirkada dayactirka sidoo kale u qaabilsanaha dayctirka guriga.

Xasuuso wixii cilad ah inaad kusoo wargelin karto adeega OmaSATO, iimeyl sato.fi:ssä ama teleefon. Dhismooyinka qaar sabuurada ogeysiiska waxaad ka heleysaa QR-kood aad ugu diri karto cilida jirta.

**Hambalyo hoygaaga cusub!**

# 2. KU NOOLAANSHAHA ABC

Halkan waxaa ah liis aad ka heleyso xogo la xiriira tusmooyin ku noolaanshaha iyo adeega. Haddii markaad heshiiska galeysey lagu siiyey xog ama tusmo, taas iyadaa ku dhaqan marka hore.

### Xogta macmiilka

Si adeeggayaga macmiilku u noqdo mid fiican, waxan leenahay nidaam xogta macmiilka ah halkaasi oonu ku kaydino xogta iyo tafaasiisha la-xidhiidhka macmiilka (taleefanada, iimaylada, waraaqaha iyo waydiimaha) anaga oo raacayna oggolaanshaha aad bixisay markii aad gudbisay dalabka gurigaaga.

Waxaad xasuusataa, in aannan macluumaadka lala wadaageyn cid aan ka aheyn kireystaha hoyga ee ku qoran heshiiska. Haddii aad ruux kale u xalineyso arrimo la xiriira hoyga, waxaan kaaga baahan nahay caddeynta wakiilnimo. Wakiilnimada warqadeeda waxaad ka heleyhsaa bogga sato.fi.

Waxaad ka heli doontaa macluumaad aad u faahfaahsan oo kusaabsan nidaamka xogta macmiilka iyo ilaalinta shuruudaha isticmaalka sato.fi.

### Qasaalada maacuunta

Xirista qasaalada maacuunta waa in uu xiraa ruux aqoonteeda leh markaad ka guureyso hoyga SATO waa inaad dib ugu celisaa qaanadihii aad ka saartey markaad qasaalada ku xireysey. Albaabka qaanada aad ka furtana ku keydi tusaale baqaarka alaabta.

### Barnaamijyada dadka deegaanka ah

Barnaamijyada aan u qabano ee lacag la'aanta dadka deegaanka ah xog wanaagsan oo la xiriirta waxaad ka heli kartaa OmaSATO Sidoo kale la soco wargeysyadeena iyo weliba baraheena bulshada!

### Iskaashiga deggenayaasha

Ma rabtaa inaad qeyb ka noqoto dhismaha aad ku nooshahay howlaha wadajirka looga qabto. Wax ka weydii maddaxa adeega, inuu jiro gudiga xaafada. Haddii jawaabtu ay noqoto maya, waad ka abaabuli kartaa gudi ama inaad shir iskaa ah inaad qabanqaabiso. Su'aal maddaxa maamulka haddaad u baahan tahay caawimo.

Guriga degmada gudiga xaafada iyagaa doorta wakiilkooda waddankoo idil maareynta nolosha, taasooy kaga wada hadlaan howlaha niddaam ee ka dhaxeeya, howlahaasna waxaa kamida iney bayaan ka sameeyaan caddada kirada. Haddaadan garaneyn hoyga aad degan tahay inuu yahay guri degmo, nala soo xiriir waanu kuu xaqiijineynaaye.

### Kaalmada kirada guriga

Dalabyada kaalmada kirada guriga waxa laga codsadaa xafiiska howlgabka (Kela). Ciiwaanka waa kela.fi waxaad sidoo kale ka heleysaa shaxda lagu xisaabiyo ama lagu qiimeeyo inaad xaq u leedahay kaalmada kirada guriga. Macaamiisha SATO haddaad tahay uma baahnid inaad xogta hoygaaga u dirto xafiiska kelada markaad ka dalbaneyso caawimada kirada guriga. Kelada iyadaa si elektoroonik ah usoo weydiisaneysa shirkada SATO. Xogta la siinayaana waa mida aad kusoo qortey codsiga aad guriga kusoo dalbatey. Kharashka iyo xogta biilka iyo kaalmadaba in toos loogu soo shubo kireeyaha guriga.




### Xiliga buuq la'aanta hoyga

Inta u dhaxeysa saacaha 22–07 waa inaad xushmeysaa deriskaaga si ay ugu nasteexeystaan habeenkooda. Wakhti hore wargeli deriskaaga, haddii aad qabto xaflad ama aad wax kale qabsaneyso, taasoo keeneysa shanqar dheeriya. Adigoo wargeliyey haddana hubbi inaadan khash-khashaad dheeriya ku sameyn deriskaaga.

Had iyo goor xaaladu ma noqoto hadba sida la jecel, oo mararka qaar waxaa suurogal ah, in shanqar dheriya ka maqasho deriskaaga, taasood aad dhibsato, kala hadal marka hore deriskaaga inaad dhibsaneyso. Waa laga yaabaa, in sharqantaasi ahaato muusik ama filim uu qofka daawanayo. Haddii adigoo kala hadley deriskaaga haddana shanqartii sii socoto si joogta ah. La soo xiriir SATO.

sato

## Fureyaasha

Waan diiwaangelinaa furayaasha. Furihii dhuma daabacada fure kale ama in labadalo qataarka guriga, wixii kharash ee ka yimaada waxaa lagu dalacayaa macmiilka guriga. Dalabka furayaasha waxaad ka sameyn kartaa OmaSATO.

Haddii albaabka yahay mid isku xira nidaamka elektaroonika ah, wuxuu aruuriyaa ama keydiyaa furista iyo isticmaalka furaha, xogtaasoo loo adeegsan karo haddii waxyeelo ama cilad timaato iyo weliba haddii faldenbi dhaco ama si qaldan loo isticmaalo si loo ogaado. Goobaha dadka wada isticmaalaan iyo albaabaadkooda furaha loo isticmaalo ama leysku dayey in loo isticmaalo waa diiwaan gashaa. balse isticmaalka furista albaabkaaga lama diiwaangeliyo.

## Barxada guriga

Howl wadaaga wadajirka ee dadka ku wada nool dhismaha, waxay ka muuqataa barxada gurigooda. Xiliyada kala duwan ee sannadka, in la wada wanaajiyo bilicda barxada guriga, taasina adiga iyo dhammaan inta ku nool dhismaha waa u farxad. Sida niddaamku yahay dayactirka iyo howlaha hagaajinta barxada guriga ay tahay, iney shirkada daryeelka qabato, balse howlo dheeriya waad ka qaban kartaa.

Bilicda qurxoon ee baraxda guriga, waxay saameysaa amniga barxada. Xasuuso inaad u hoggaansanaato tusmada dhigashada gaariga, sidoo kalena aadan dhigin gaarigaaga xaafada horteeda.

## Wakhtiga sawnada

Waad qabsan kartaa wakhti sawnada ku taal dhismahaaga, shirkada dayactirka dhismooyinka qaar waxay leeyahay niddaam elektaroonik ballamaha lagu qabsado, dhismooyinka qaarna waxaad ballanta ka sameysan kartaa OmaSato. Sawnada dad baddan ayaa isticmaala, sidaa darteed waa wax wanaagsan inaad maro salka dhigato markaad ku fadhiisaneyso. Xasuuso inaad ka shaqeyso nadaafada sawnada iyo qolka qubeyska si dadka kugu xiga u isticmaalaan.

Dhismooyin badana waxay leeyihiin sawno si wadajira loo isticmaalo, tusaalle sawnada "aalamiintada" kadib taasna waa lacag la'aan.

## Sharaxaad iyo waxyaabaha ku xiran

Qaabka qurxinta adigaa u maddax banaan, laakiin dayactir qaarkiis waa inaad madaxa ku heysaa markii aad quruxineyso hoygaaga. Ogsoonow waxyaabaha derbiga lagu xiro/dhejiyo derbiyadu way kala duwan yihiin, si sharaxaada aad ku dhegsaneyso u wanaagsanaato qatarna u noqon. Derbiyada dhexe ee qafiifka ah haku dhejin wax culus. Musqusha qubeyska (derbiga gudihiisa iyo bannaankiisaba) ama derbiga ka danbeeyee safiitada/jilicsan ma aha in la dalooliyo ama wax lagu dhejiyo. Masaabiirta ama waxa waxla suro warbixinta la xiriirta waxaad ka heleysaa dukaanka qalabka dhismooyinka. Saqafka guriga laguma xiri karo waxaan ka aheyn dab kaga digaha. Masaabiirta wax la suro/dhejiyo waxaad weydiin kartaa dukaamada qalabka dhismooyinka. Sidoo kale agabka guriga kuwa lugaha leh halka hoose waa inaad kaga xidhaa wax ka badbaadiya ineysan dhulka/rooga wax yeelin.

## Shabaqa daaqadaha lagu xiro

Shabaqa daaqadaha lagu xiro adigoo iska bixinaya kharashkooda, waad ku xiran kartaa ogollaansho la'aan. Markaad guureyso waa inaad kaga taktaa oodan ka furin, wax kharashna laguuma soo celinayo.

## Handaraabka amniga iyo duleelka albaabka wax laga eego

Waad u dalban kartaa hoygaaga handaraabka dheeriga iyo duleelka albaabka wax laga eego ood adigaa kharashkaaga ku sameysan kara cidnana ugama baahnid ogolaansho gaar ah. Ogsoonow handaraabka waxaad kadalban kartaa oo qura hoygaas shirkada furayaasha iyo handaraabyada. Warbixintoodana waxaad ka heleysaa adigoo lasoo xiriira adeega macaamiisha. Markaad ka guureyso guriga, waa inaad halkooda uga takto handaraabga amniga iyo duleelka wax laga eego, furahayaasha o dhana waa inaad soo celisaa. Kuuma celineyno kharashka kaaga baxay handaraabka ama daloolka albaaka. Wax kale kama badeli kartid albaabka.

## Soo celinta lacagta deebaajiga sanad kadib markaad dagen tahay

Waxa dhici karta inaad mutaysato, in laguu celiyo lacagta lagaa dhigey, marka aad ku noolaato guriga SATO muddo ah hal sano bilaa rabash, kiradana aad ku bixineysey wakhtigeeda. Macluumaad dheeri ah foomka soo celinta daboosiga/deebaajiga waxaad ka heleysaa OmaSATO iyo weliba sato.fi. Waxaanu ku dhammayn doonaa codsigaaga hal bil gudahood.

## Bay'ada

Waxaan siinaa arrimaha bey'ada tixgalin gaar ah hawlgalada. Dhinacyada bey'ada waxa xooga la saaraa dhismaha, nashqadda iyo isticmaalka dhismayaasha. Waxaan mudnaanta siinaa inaan horumarino tamarta hoyga sidoo kalena la yareeyo isticmaalka biyaha, sidoo kalena hormarino sidii dib laguu isticmaali lahaa, taasina waxay yareyneysaa kharashka dib u haagaajinta iyo dhibaatooyinka fatahaadaha

Boga 14 iyo 15 waxaad ka heleysaa xog, taasood ku dhaqaaleyn karto isticmaalka danabka iyo biyaha hoygaaga barnaamijka bay'ada waad ka dheehan kartaa sato.fi .

Haagaajinta iyo maareynta khashinka shirkadeenu waxay u leedahay muhiimad gaar ah. Aqalka khashinka nadaafadiisa dhibaatada khashinka daryeelkeeda iyo iyadoo khashinkii si sax loo maareeyo Tusmo la xiriirta arrinkaas waxaad ka heleysaa boga 16 iyo 17 sida khashinka loo maareeyo.






## Wax inooga sheeg, sidey xaaladaadu tahay!

Waxaan jecelnahay inaan kuu ahaano kireeye wanaagsan, sidoo kalena aanu u hormarino hoyga faraca danbe ee soo socda. Sidaa darteed waa muhiim inaan ka warheyno xaaladaada sidey tahay.

Waxaan wax ka weydiin doonaa waxyaabo baddan marka aad usoo guurto guryaha SATO. Waxaan ku soo direynaa su'aalaha teleefonkaaga ama iimeylkaaga. Sidaa darteed hadduu teleefonkaaga ama iimeylkaagu isbadelo nasoo wargeli si xiriirku uusan u go'in.


Waad nagala soo xiriiri kartaa faalona ka bixin kartaaadigoo soo wacaya adeega macaamiisha, bogga facebook-ga qeybtaqoraal ku sheekeysiga ama iimeyl ahaan asiakaspalvelu@sato.fi ama qabaar ahaan OmaSATO.



## Boonada rinjiga iyo iskaa u dayactirka

Waxaad ka heleysaa SATO Boono lacag la'aan ah ood rinjiga iyo qalabkiisa aad kusoo qaadaneyso, haddii aad rabtoinaad rinjiyeyso hoygaaga. Boonada rinjigana waxaad kusoo qaadan kartaa rinjiga iyo qalabka rinjiyeynta eed u baahan tahay. Midabka waxaad ka dooran kartaa liiska midabada SATO. Xogo dheeriya haddaad rabto inaad dayactirto, iyo tusaale naqshadaha kala duwan ee midabada waxaad ka heleysaa ciiwaanka sato.fi/omatoimiremontti.

## Isticmaalka qolka qasaalada dharka iyo qalajisada



### Goobaha la waddaago


Dhismaha aad ku nooshahay goobaha la waddaago waxaad ku garan kartaa sawirka ku dhegan albaabka. Illaali nadaafada goobaha la waddaago, ka hagaaji khashinkaaga. Dhismayaasha SATO oo idil goobaha la waddaago in sigaar ama wax qaacaya lagu cabo waa ka reeban tahay.

#### Baqaarka la dhigto alaabta



Baqaarka alaabaadka la dhigto waxaad kaga faa'iideysan kartaa inaad dhigato dharka xiliyada kala duwan la xirto, boorsooyinka safarada. Baqaarka kuma hab-boona inaad ku keydsato alaab ama shey qaaliya ama qiimo baddan, taasoo damac gelin karta tuugada. Jabsiga baqaarka-na waxaad uga hort aktaa inaad isticmaasho quful weyn albaabka baqaarka. Amniga dabka dartiis ha ku keydin baqaarka waxyaa-baha ololka u sahlan sidoo kale walxaha darooraha, gaaska ama qaraxa ee ololka ka dhalin karo iyaguna waa ka mamanuuc. Taa-yarada gaariga ugu badnaan afar xabbo waad ku keydsan kartaa.

#### Qolka qasaalada iyo qalajisada



Dhismooyin badan waxay leeyihiin goobta qasaaladaha dharka iyo qol qalajiso istic-maalkeeduna waa u lacag la'aan dadka degaanka ah. Tusmoo-yinka ballamaha iyo isticmaalka qasaaladaha waxaad ka heli kartaa goobta ay qasaaladu taalo ama qolka qalajisada ama derbiga lagu dhajiyo ogeysii-syada ee dhismaha. Roogaga laguma dhaqi karo qasaaladaha dharka, sababtoo ah qasaalada dhaqmada iyo qalajisadaba wey ku culustahay rooga qoyan.

#### Qolka kulamada



Dhismooyinka SATO badankood waxy leeyihiin qol kulamada, kaasooy isticmaali karaan dadka dhismaha ku nool iney wakhti kuwada qaataan, wax kuwada qabsadaan ama ay ku qabsa-daan xaflada sida dhalashada carruurta. Niddaamka iyo sha-raxaada qolka kulamada waxaa inta badan masuuliyadeeda leh guddiga xaafada. Faahfaahin dheeriya waxaad ka heli kartaa guddoomiyaha gudiga xaafada ama maddaxa adeega.

#### Goobta khasinka




Nadaafada goobta qashinka waxay saameyn badan ku leedahay ku nasteexeysiga dhismaha. Waa muhiim in bacaha khashinka la geeyo halka loogu talogaley dhulkana inuu ahaado nadiif. Sidoo kale carruurta reerkana waa in la baraa qaabka wanaagsan ee loo maareeyo khashinka. Tusmada maareynta khashinka waxaad ka heleysaa boga 16-17.

#### Qolka kaydinta gaadiidka carruurta



Waxyaalaha gaadiidka carruur-ta waa in lagu kaydiyo mee-laha loogu talogalay ee qolka kaydinta gaadiidka carruurta. Haddii aadan helin qolka lagu keydiyo gaariga carruurta weydii shirkada dayactirka dhismaha meesha ku habboon ee amniga ah.

#### Daarada guriga laga soo galo



Amniga dabka dartiis waa arrin muhiim ah. Sidaa darteed deerka guriga ama daarada guriga laga soo galo innaan wax alaab ah la dhigi karin xi-taa rooga yar ee albaabka ama gaariga carruurta. Sharaxaada albaaka ku dhegan waa la ogol yahay.

sato

# 3. XEERKA GUUD EE LOOSIMAN YAHAY

### Aan wadajir u dayactirno hoygaaga

Hoygaaga iyo dhismaha gurigaaga hagaajintiisa iyo bilicsanaantiisa sidii looga shaqeyn lahaa waa mid adiga iyo SATO howsheeda u taalo. Hoygaaga waxaa suurogal ah in dhismaha uu ku yaalo iney gebi ahaan leedahay SATO ama iney qeyb ku leeyihiin. Sidaa ama sidatan waan dayactireynaa hoygaaga si wadajira, sidoo kalena inaan arruurino faalooyinka howlaha la qabtey iyadoo la weydiineyo dadka ku nool hoyga, tusaale iyadoo macaamiisha la weydiin doono su'aalo la xirriira qanacsanaantooda. Haddii SATO tahay milkiilaha dhismahoo idil, waxaay sidoo kale masuuliyadeeda leeyihiin heshiis la gelista shirkada dayactirka iyo iney la socdaan hirgelinta qabashada howsha. Haddii aan leenahay dhismaha qeyb kamid ah markaa masuuliyada waxaa leh gudiga shirkada guryaha iyo shirkada dayactirka.

Dhammaan guryaha SATO waanu la soconeynaa dayactirkooda iyo weliba in si joogta ah lagula soconaya sameeynayo kormeer dayactir. Waa muhiim inaad illaaliso samaanta hoygaaga sida inaad joogto ahaan u nadiifiso hoygaaga. Heshiiska kirada guriga ayaad ka heleysaa xogta la xiriirta waajibaadka kaa saaran hoygaaga, laakiin mudnaanta ma aha oo keliya waxa lagu farayo: ee hadba sidaad ugu dadaasho dayactirka hoygaaga iyo nawaaxigiisa ayaad si wanaagsan ugu nasteexeysan sidoo kalena qalbi wanaagaasna si sahlan ay deriskaagu kaaga daydaan.

### Shaxda qeybsiga masuuliyadda

Hawlaha la xidhiidha masuuliyadaha dayactirka iyo xafidista hoyga waxa loo qaybiyey SATO iyo dadka ku nool . Si aad u ogaato hawlaha SATO qaabilsan tahay iyo kuwa adiga aad qaabilsan tahay, fiiri tusmadan qaybsiga Masuuliyadaha ee Lifaaqa 2 ee hagahan.

### Qiimaha biilasha macmiilka

Haddi aad wax ka jabiso guriga ama agabka dhexyaala ee u gaarka ah hoyga ama dhismaha goobta la wada isticmaalo, waxaanu kaa maganeynaa kharashka inooga baxa dayactirkaas sida waafaqsan qiimaha biilka macmiilka. Xasuuso inaad adigu ka masuul tahay martida kuu joogta. Sidoo kalena xaq waxaan u leenahay inaan dhammaan wixii kharash nooga baxa kaa magano. Kharasha iyo qiimaha biilka waxaad ka heleysaa sato.fi.

### Xogta macmiilka

Ogaysii Adeegga Macmiilka SATO haddii deggane cusub soo galo ama deggane ka baxo hoyga inta aad meesha deggan tahay. Tani waxay naga caawineysaa keydinta iyo la socoshada xogta macaamiisha ku nool dhismaha, sidoo kalena waxaan ku hubsaneynaa cida loo furi karo hoygaas haddii furaha gudaha isaga xiro, sidoo kale inta ruux ee degan hoyga waxay saameyneysa kharshka isticmaalka biyaha. Sidoo kale waxaanu si joogto ah u hubinaa xogta degganayaasha anaga oo kusalaynayna niddaamka diiwaangelinta dadweynaha.

### Qiimaha ay leedahay inaad degan tahay guryaha sato

Marka aad ku nooshahay guryaha SATO waxaad balan qaadey inaad dhowreyso qiimaha ay leedahay SATO, si ay noloshu u kuugu ahaato mid habsi leh iyo ladnaansho nawaaxigaaga.
Haddaan nahay shirkada SATO waxaan ballan qaadeynaa inaan idinka caawino ilaalinta qiimaha Waxaan idinka caawineynaa deris wanaaga, waxaan wanaajineynaa goobaha la wadaago, waxaan idin siineynaa talooyin bixinta kirada. Waxaan masuuliyad gaara iska saareynaa inaad hesho adeeg macmiil hufan.

#### Deris wanaag

Xushmee oo tixgeli deriskaaga iney ku nasteexeystaan hoygooda. U hoggaansanow xeerka u yaala dhismaha iyo howlaha sida gaarka loogu heshiiyey.

#### Bilicsanaanta nawaaxiga

Inaadan bannaanka guriga alaabaad dhigin sidoo kalena aad ka hagaajiso wixii aad ku sameysato, hagaaji sidoo kale isticmaalkaaga kadib goobaha la wadaago. Sidoo kalena xil gaarana iska saar nadaafada qolka khashinka.

#### Masuuliyada bixinta kirada guriga

Iska bixi lacagta kirada guriga, si aan kharash dheeriya laguugu soo dalacin.

## Kirada

Dhismooyinka SATO qiimaheeda kirada waa mid ku saleysan waafaqsanaanta sicirka suuqa. Balse halka ay kaga duwan tahay waa guryaha kirada ee dheefta laga helo, taasoo kirada lagu qiimeyo hadba kharashaadka ku baxa iyo amaahda guriga. Faahfaahin dheeriya guryaha kirada ee maalingelinta lagu dhisey hadba xadiga kirada waxaad ka ogaaneysaa ciiwaanka www.ara.fi. Qiimeynta caddada kiradana waxaa lagu saleeyaa hadba sida: goobta uu ku yaalo guriga, baaxada dhismaha weyn ama yar, cabbirkiisa, hoyga inta uu la eg yahay iyo tayadiisa iyo xiliga dayactirka danbe lagu sameyn doono. Caddada kirada guriga iyo xiliga la xaqiijinayo waxaad ka heleysaa heshiiska guriga Waxaad naga heleysaa xogta xaqiijinta iyo kharashku halka uu ka imaanayo oon sanad walba boostada kuugu soo direyno, tafaasiishaana waxaad ku arkeysaa qiimaha kirada cusub, wakhtiga ay billaabaneyso iyo weliba akoonka iyo lambarka biilka. Kiradu sideedaas ayey ahaan ilaa aad ka hesho mid cusub. Ma aha inaan bil walba kuu soo direyno biil kirada.

Biilka kirada waa in labixiyaa bil walba 2'deeda. Heshiiska korontada waad kula geli kartaa qaab elektaronik ah adoo sumada lambarada bankiga isiticmaalaya. Biilkuna wuxuu kuugu imaanayaa qaab elektaronik ah bil walba waxaad heleysaa



macluumaad la xiriira bixinta kirada guriga waxaad si toos ugu xiran kartaa biilka bankigaaga, markaas uma baahnid inaad ka walwasho biil iyo bixintiis. Xasuuso inaad markaad ku xireyso bankigaaga ku qorto cida loo shubayo oo ah SATO-Konserniyhtiöt/SATO Oyj sidoo kalena isticmaal ama ku qor lamarka tixraaca si loo waafijiyo xogtaada.

SATO lacagta magdhowga waxaau qaabilsan shirkada Ropo Capital. Haddii aad biilka lasoo daahdo, Ropo Capital ayaa kuusoo direysa biil xasuusin ah iyagaana kugu soo dalacanaya kharashka la habsaamida iyo xasuusintaba wixii uga baxey. Haddii aad rabto inaad kala xaajooto arrimaha biilka waxaad toos ula xiriirtaa adeega macaamiisha ee Ropo Capital.

## Deris wanaag

Dabaqyada iyo guryaha gaagaaban dadka ku nool waa deris nolol degaan wadaaga. In lays bariidiyo ayaa deriska ku filan, kuwo qaar waxay jecel yihiin in leys barto Muhiimaduse waa inaad qadarisaa dadka nawaaxigaaga dagan. Markuu ruux walba ka digtoonaado shanqarta xooga ee kabadan mida nolosha caadiga, uusan noqona mid deriskaagu dhibsan. Haddii aad kala kulanto hoygaaga caqabad iyo qashqashaad la soo xiriir SATO.

Xasuuso sidoo kale dhismooyinka SATO in xeerka guud (boga 23) idin khuseeyo adiga iyo qoyskaaga iyo martidiina.

## Soo wargeli wixii khaldan

Haddii aad aragto wax ka maqan amniga dhismaha, waxyeeleyn ulakac ah, khaskhashaad soo noqnoqtey ama wax haleysan oo u baahan in la hagaajiyo.



# 4. DARYEELKA WANAAGSAN EE HOYGA

### Nadiifinta filtaraha saara hawada



> **Hubi neecaawda wanaagsan ee gudaha**
>
> - Waxba haka badelin hawo saaraha
> - Ha furnaado kanaalka hawo saaraha
> - Nadiifi filtaraha hawo saaraha ugu yaraan sanadkii labo jeer
> - Joogto u nadiifi hoygaaga
> - Sigaar haku cabin gudaha
> - Ka taxadar dharka boorka leh, xayawaanka rabaayada iyo dhirta guriyeedka la beero.
> - Si gaara uga foojignow, in isbedelka hawada guriga gudihiisa si wanaagsan shaqeyneyso
>
> Haddii hawo saaraha guriga adigoo ka shaqeeyey hadana weli uusan shaqeyneyn, lasoo xiriir shirkada dayactirka.

### 4.1. Neecaaw wanaagsan gudaha

Markii hoyga kanaalka hawo saaraha uu yahay nadiif una shaqeynayo caqabad la'aan, waa in hawada labadii saacadoodba mar is bedeshaa.

Hawo-siinta iyo dhuumaha hawo-siinta oo nadiif ah. Uumiga iyo huurka waxa lagu saaraa khananka saarista hawada. Waxay ku yaalaan kaanaladaas hawada saara ama soo geliya musqulaha jikada iyo qolka dharka.

Naacoowda cusub waxay soo gashaa iyadoo derbiga guriga usoo mareysa ama jirjirka daaqadaha aan ni-gaxa sida wanaagsan loogu xirin daaqada dusheeda.

### 4.2. Nadiifinta guriga

Muhiimada kowaad ee daryeelka hoyga waa waa-jibaadka ah inaad si joogta ah u nadiifiso. Markii gurigu nadiif yahay naacoow tayo lehna wey soo geli dhulkii oo haggaagsan.

Waxyaabaha kala duwan ee laga sameeyo sagxa-da hoyga siyaabo kala duwan ayaa loo nadiifiyaa. Dhammaan nooc walbooy yihiin qalabka wax lagu nadiifiyo keenso, oo kuu anfacaya adiga iyo sakxada guriga. Hab qallalan ama qoyaan yar ku dhaq sida nadaafada dabiiciga aan kiimikaalka aheyn.

Markaad si joogta u nadiifiso hoyga badi wasaqda waxay ka baabeysaa gurigii adigoo biyo keliya ku masaxa ama shaanbada maacuunta. SAHALAN!

### Daaqadaha

Nadiifinta daaqadaha waxaad u baahan tahay wixii aad ku nadiifin laheyd, istiraasho gaar ah oo lagu masaxo, qalajiye iyo weliba walxihii lagu dhaqayey, sidoo kale shabaqa daaqada ku xiran waa inaad ka huufareysaa habaaska, sidoo kalena jirjirka daaqada iyo daldaloodada daaqada.

### Derbiga

Derbiyada rinjiyeysan nadiifintooda u isticmaal waxyaa-baha wax lagu dhaqo ee fudud si aan qoyaan badan laheyn, inta badan rinjiga aan aadka loo marin der-bigana wax badan uma dulqaadanayo inaad xoqdo. Waxaad kaga badbaadi kartaa inaad derbiga dhaqdo adigoo marka hore wasaqdu markey gaadho inaad ka masaxdo. Derbiga mutuneelka isaga in la dhaqo iyo qoyaankaba waa lagu sameyn karaa iyo in xoog loo masaxo. Haddii derbigu midabka danbasiga noqdo dhaqmada kadib markaa ciirada ayuu u sameeysan yahay. Derbiga waraaqaha Tapeti –ka kasameysan inaad si aad uga foojignaato nadiifintooda, hana xoqin, nooca Vinyyli-ga waxaad ku masaxi kartaa istiraasho qoyan iyo buraashba.

## Nadiifinta dhulka



### Dhulka/Sakxada

Shumaca dhulka ama safiitada dhulka/sakxada inaad si qoyaan yar aad ku dhaqdo. Sakxada safiitada ama looxa wey sahalan tahay iney wax noqoto haddii shambooyinka culus lagu dhaqo, hana xoqin sababtoo ah wey xoqmi ama jabi. Haddii aad u baahato inaad dhaqdo isla markiiba ka masax qoyaanka hana uga tegin qoyaan.

Sakxada shumaca waa mid inta badan qoyaanka u dulqaadata, taasoo isbuuci mar in la huufareeyo ay ku filan tahay iyo iskoobe la mariyo ama lagu tirtiro shanbaada maacuunta.

### Musqusha qubeyska

Sawnada iyo suuliga qubeyska nadiifintooda joogtada hadba waxay ku xiran tahay isticmaalkaaga. Haddii suuliga qubeyska lagu dhaqo dharka waa in habaaska laga huufareeyaa, sawnada iyo suuliga qubeyskuba waxay u baahan neecaaw ama hawo cusub soo gasho.

### Qaboojiha iyo Talaakada


Haddii qaboojiyahaagu uu leeyahay nidaamka otomaatiga ah ee dhalaalinta barafka waxay barafka u dhalaalin doontaa si otomaatig ah. Waxaad kaliya u baahan doontaa nadiifinta daloolka dureerka ee dhabarka qaboojiyaha. Haddii qaboojiyahaagu aanu ahayn dhalaaliye otomaatig ah, waxaad u baahan tahay inaad dhalaaliso bishii mar.

Qaboojiyaha-barafeeyaha waa barafka laga dhalaaliyaa laba jeer sannadkii. Ha isticmaalin xoog ama qalabka murxinta si aad uga qubto barafeeyaha barafka. Ha isticmaalin nafiifiye xooggan si aad u nadiifiso qaboojiyahaaga. Isha ku hay qaboojiyahaaga ama barafeeyaha marka aad barafka ka madhinayso, adiga oo hubinaya inay biyuhu ka qallalaan iyaga oo wali kujira gudaheega si aad uga hortagto biyuhu inay ku qubtaan dhulka. Huufar ku nadiifi halka ka dambaysa qaboojiyahaaga dhawr jeer sanadkii.

### Foornada iyo Showlada

Nadiifin joogto ah waa qaabka ugu fiican showlada maadaama ay aad u adag tahay in laga gooyo dilliilimaha ku dhagay oogada kulul. Waraabi/qoo

### Dhaqista marwaxada uumiga iyo urta raashinka saarta



wixii cunto ku qallashay si ay u fududaato in laga jaro oo isticmaal nadiifiye ku habboon nooca girgiraha. Isticmaal nadiifiye foornada oo khaas ah si aad u nadiifiso foornada, nigaxa iyo taraayada foornada.

Nadiifi marwaxadda saarta qiica madbakha/boolka iyo shabaqa dufanka ugu yaraan laba jeer sannadkii iyo ka badan haddii laga maarmi waayo. Waxaad ka heli doontaa kan saara hawada hoosta shabaqa

### Balakoonka

Baalakoonka nadaafadiisu wanaagsan tahay, waxaa kaaga soo galayo neecaaw wanaagsan. Balakoonkaaga waa inaad mararka qaar ku dhaqdaa biyo aan badneyn, sababtoo ah halka biyuhu ka baxaan waxaa loogu talogaley iney biyaha roobku ka baxaan, ma aha inaad baaldi/sakeel biyaha wax lagu dhaqo ku shubto.

Xiliga barafka adigey masuuliyad kaa saaran tahay inaad ka hagaajiso barafka balakoonkaaga. Barafka ha uga daadin bannaanka balkoonka ee waxaad geysaa musqusha qubeyska si uu ugu dhalaalo kadibna ka biyo raaci.

Balakoonada ku daahan miraayada waxay ka dhowraan balakoonka biyaha iyo barafka iney soo galaan. Waa wax wanaagsan iney miraayaduhu xirnaadaan xiliga barafka.

sato




**Nadiifinta bulaacada/godka dhulka**

(Samee bil walb)


- Soo bixi daboolka caaga
- Ku nadiifi biyo walxaha wax lagu dhaqo xoqna
- Nadiifi jirjida kana saar khashinka iyo timaha
- Waad ku sameysan kartaa godka filter dheeriya, si aysan timuhu u galin ama ugu arruurin godka.
- Adigoo intaa sameeyey hadduu godkii xiran yahay la xiriir shirkada dayactir-ka.




**Nadiifinta qasabada biyaha**

(Markii aysan bulaacada biyaha saareyn)

- Nadiifi waaskada iyo filtaraha celiya urka qeybta hoose ama wareeji qeybta hoose si ay kuugu kala furanto
- Biyo raaci qeybta hoose filtara urka celiya kadibna halkoodii ku celi
- Xasuuso in nikaxyada aad ku celiso booskooda
- Ku fur biyo tijaabo ah iney biyo sii dey-neyso biyo.




### 4.3. Diirnaanshaha / Hiidka

Heerkulbeega qolka ee caafimaadka ah waa inta u dhaxeysa +20–21° C qolka fadhiga iyo 18 - 20° C qolka jiifka. Waa inaad ku kalsoonaataa cabirka halbeega ee guriga. Hiiterka waa laga yaabaa mararka qaar inuu qabow yahay, balse heerkulka guriga uusan isbadelin.

Heerkulka hoygaaga waxaad kor ugu qaadi kartaa ama hoos adigoo bateriga/hiitka dheereeyegaabiyaha isticmaalaya inaad heerkulkii dheereyso ama aad gaabiso. Haddaad ku daboosho heerkul bixiyaha daah ama agabka guriga uma shaqeyn doono si sax ah. Sidaa darteed u foojignow sharxista hoygaaga.

La xiriir shirkada dayactirka, haddi adigoo demiyedaaraha hiitarka dhan walba u dhigey hoygaaguna weli yahay qabow ama kuleyl. Shirkada dayactirka ayaa hagaajineysa qaabka shaqo ee hiiterka, haddii uusan hiiterku kululaaneynba. La xiriir shirkada dayactirka sidoo kale haddii uu shanqarayo hiiterku ama uu sii deynayo biyo. Qolka dhaqmada had iyo goor ha daarnaadaan hiiterkoodu, si ay dhaqso kuugu qalaalaan dharka. Sidoo kale sakxada qolka dhaqmada had iyo goor wey diirran tahay, sababtoo ah waxay dedejisaa inuu dhulku/saxkada dhaqso u qalasho, waxayna kahor tageysaa in qoyaan galo dhulkii oo ciladi timaato.

**Xogta dhaqaaleynta danabka**

- Dhaqaaleynta korontada waa inugu waajib dhammaanteen, markii aad hoos u dhinto heerkulka hoyga waxay hoos u dhigeysaa kharashkii korontada boqolkiiba shan.
- Haddii heerkulka gurigaagu sareeyo si aad ah, yaree hiiterka inaad hoos u dhigto, si dhaqso lehna guriga hawo usii waa wax wanaagsan hawo siinta hoyga.
- Nadiifi oo barafka ka dhalaali qaboojisada si joogto ah. Marnaba ha gelin raashin kulul talaagada iyo qaboojisada, heerkul sax ahna gee qaboojisada -18 °C iyo talaagada +5°C.
- Qaasalada maacuunta iyo dharka iyagoo buuxa wax ku dhaqo.
- Guluubka ama nalalka aad isticmaaleyso ha ahaadaan kuwa korontada dhaqaaleeya.
- Qalabka wax lagu dhageysto ama lagu daawado isticmaalka kadib demi.
- Demi nalalka goobaha la wadaago.
- Baaqarada hoose ee leh qaboojiyaasha albaabkooda si wanaagsan u xir.
- Marwaxda qolka qalajisada demi markaad ku dhameysato howshaada.
- Isticmaalka korontada baarkinka waxay habboon tahay markuu herkulku ka yaraado +5°C



## 4.4. Biyaha iyo bulaacada

Weligaa marnaba hagelin godka musqusha iyo bulaacada wax khashin ama inaad ku shubto daroore saliid ah tus. Saliida wax lagu shiilo ama wax lagu dubey ama kiimikada.

Haddii bulaacadu is xirto biyo haku shibin. Ur celiyaha ayaa ka ilaalinaya ineysan urtu kasoo bixin qolka. Ur dhowraha wuxuu celiyaa urka bulucaada siiba markii guriga laga maqan (tus. xiliga fasaxa). Haddii ay dhacdo in urtii soo baxdo biyo ku fur si bulaacadii qalaneyd ay u qoydo.

**Xogta dhaqaaleynta biyaha**

- Biyuhu yaaney macno darnaan u furnaan xiliga qubeyska ee aad is marineyso saabuunta iska xir biyaha.
- Qaaslada dharka iyo maacuunta iyadoo buuxda wax ku dhaqo ama haddey dhiman tahay waxaad ku dhaqdaa barnaamijka dhaqsaha ah.
- Biyaha qabowga aad rabto taalagada ku qabowso, si aadan macno daro u firin biyii ilaa aad biyo qabow ka heleyso ood cabto.
- Xiliga xagaaga dhirta barxada guriga habeenkii waraabi, ha waraabin xiliga cadceedu jirto, haddey suurogal tahayna waraabi xiliga roobka. Kharashka biyaha waxaa kordhin kara xitaa haddii ay musqushu sii deyneyso biyo, haddii ay meeli biyo beerdareeneyso isla markaasba waa inaad soo wargelisaa shirkada dayactirka. Inaad la soo xiriirtana waa muhiim haddii qasabadaha biyaha qabow iyo kuleylku aysan caadi u shaqeyneyn iyo qasabadaha musqusha.



## 4.5. Maareynta khashinka

Waxaad ka heli doontaa tilmaamaha kala-sooca khashinka weelka khashinka agtooda. Ha ka xishoon inaad waydiisato jaarkaaga ama maddaxa adeega macaamiisha caawimo haddii laga maarmi waayo.

Waxaan kugu boorineynaa inaad maareyso, kala soocdo khashinka dhismahaaga waxaa ku yaal qol/deyr ama haamaha khashinka. U kala sooc khashinka si foojigan mid walba halka loogu talogaley ku rid. U kala sooc khashinka sida-. Khashinka isku dhafan, hambada raashinka, wargeysyada iyo kartoomada. Kala soocaas wuxuu fududeynayaa maareynta danbe ee khashinka sida in dib loosoo warshadeeyo, waana wax bey'ada u fiican. Haddii aadan garaneyn halka loogu talogaley in lagu rido khashinkaas , waxaad ku ridaa halka khashinka isku dhafan loogu talogaley. Si aysan macno daro u noqon deriskaagu khashinkii hore ay kala saareen.

Illaali nadaafada hoygaaga nawaaxigiisa. Marnaba ha dhigin ama uga tagein bacaha khashinka bannaanka weelka khashinka, dhulka ama hoygaaga hortiisa. Khashinka la dhigo bannaanka haanta khashinka waxaa ka dhalanaya in dooliga/jiirka uu yimaado. Khashinka la dhigo haanta bannaankeedan qaadis-teeda waxaa ka yimaada kharash dheeriya.

Faahfaahin dheeriya hagaajinta, maareynta khashinka iyo su'aalaha la xiriira bey'ada waxaad ka helysaa www.hsy.fi iyo www.motiva.fi.



sato

## Khashinka hambada raashinka

Hambada raashinka waxaa kamida: dufanka cuntada, khudrada, miraha iyo qolofta ukunta, lafaha iyo haraaga kalluunka, qaxwaha iyo xaashida qasharka bunka iyo bacda caleenta shaaha. Waxaa lagu maareyaa hambada raashinka meelo kala duwan oo Finland. Habka kala soocista waxaad ka heleysaa adeega maareynta kashinka gobolka.

## Arruurinta waraaqaha

Ku rid dhammaan waraaqaha kuugu soo dhaco boostada guriga, sida, jaraa'iddada iyo magaasiinada, xayeysiimada iyo galalka/baqshada waraaqaha, weelka waraaqaha. Ha ku ridin warqad qoyan ama uskag ah. Waraaqaha adag ee wax lagu rito kuwa aluumiyamka iyo kartoomada.

## Kartoomada iyo baakadaha

Arruurinta kartoomada waxaa wanaagsan baakadaha walxaha daroora sida caanaha, garoorka, iyo cabitaanada lagu shubo oo lasoo biyo raaciyey. Baakadaha la arruuriyo xitaa waxaa kamid ah baakadaha buskadka, kuwa burka ama soorta, baakadaha ukunta.

## Dhalo

Weelka dhalooyinka waad ku ridi kartaa quraaradda midabka leh kuwa arag-gudbiyaha ah laakiin maya muraayadaha daaqadda iyo marmarka. Haddii dhismahaagu aanu lahayn weel loogu talogalay quraaradda, waxaad ka heli doontaa goobo dib-u-warshadayn goobaha sida xarumaha dukaamaysiga ee waawayn.

## Birta

Waxyaalaha yaryar ee inta badan ka samaysan birta waxa lagu ridi karaa weelka birta lagu urruuriyo. Kuwan waxa kamid ah qasaacadaha cuntada, daasadaha sharaabka, taraayada iyo duubyada aluuminyamka ah, furarka birta iyo eelkaka, kuwa shumaca ku jiro ee birta ah.
Waa inaad u qaaddo iskaa wixii bir wayn oo la tuurayo geysaana xarunta Sortti waana lacag la'aan.

## Bacaha

Dhismaha waxaa laga yaabaa inuu leeyahay weelal kala duwan oo lagu arruuriyo bacaha. Weelka bacaha waxaa lagu ridaa oo keliya bacaha faaruqa ah ee wax lagu duubo/dhigo, sida kuwa khudrada lagu keeno, kuwa garoorka, kuwa subaga, kuwa saabuunta, iyo bacaha dukaanka, bacanaha ma aha in wax la dhexgeliyo, sida alaabaadka carruurtu ku ciyaarto, cadeyga buraashka ah ama qalabka jikida sidoo kalena ha ku ridin kuwa lagu keeno walaxda PVC.

## Khashinka qalabka korontada iyo elektarooniga

Kotitalouksien sähkö- ja elektroniikkaromua (SER) otetaan maksutta vastaan SER-keräyspisteissä. Katso lähin keräyspisteesi osoitteesta www.kierratys.info. SERiin kuuluvat mm. kodinkoneet, tieto- ja teletekniset laitteet, kuluttajaelektroniikka ja sähkö- ja elektroniikkatyökalut.

## Khashinka halista leh

Daawooyinkii hore cabiraha xumada waxaad geysaa farmashiyaha. Batariyada waxaa jira dukaamo badan ood ku celin kartid, ama inaad geyso weelka loogu talogaley in lagu arruuriyo.

## Dib-u-warshadaynta/dib loo isticmaalo

Waxyaabaha dib loo isticmaali karo sida agabka guriga, dharka, maacuunta iwm. Alaabtaas inaad geyso meelaha dib loogu iibin karo ama lagu arruuriyo. Agabka wanaagsan xitaa waad iibin kartaa. Dharka iyo kabaha waad geyn kartaa meelo kala duwan. Waad sameyn kartaa adiga iyo diriskaagaba inaad sameysaan qol wax lagu arruuriyo, si deriska kalena ay u keenaan waxyaabaha aysan u baahaneyn, sida jaaraa'idyada si ay u isticmaalan dadka deriska ah. Weydii wixii faahfaahin dheeriya maddaxa adeega macaamiisha.

# 5. AMNIGA HOYGA

Badbaadadda hoyga waxaaad ka heleysaa sato. fi boga dhismaha aad ku nooshahay. Haddii aad xiiseyneyso badbaadadda dadka /dhufeyska hoyga, waad ahaan kartaa masuulka qaabilsan dhufeyska dhismaha. Wax kasoo weydii maddaxa adeega macaamiisha.

### 5.1. Caymiska guriga

Sharuudaha heshiiska guriga ayey ka mid tahay inaad leedahay caymis, taasoo hoygaaga iyo waxyeelada kale eed masuuliyadeeda leedahay ku caymisan yihiin.

Waa inaad hubiso waxa ku qoran heshiiska caymiska gurigaaga si aad u hubiso inuu yahay mid shaqeynaya.

Caymiska waa midka aad ku caymineyso hantidaada, alaabaadka kuu gaarka ah oo wax noqdo iney kuu magaan caymmiskaaga. Way wanaagsan tahay inaad ka hubsato caymiskaaga inta ugu badan ee ay kuu magayaan, inta adiga lagaa rabo, sharuudaha caymiska faahfaahin dheeriya caymisyada kala duwan waxaad ka heleysaa  boga internetka shirkada caymiska.

### 5.2 Ka hortagga

Taxadarkaaga waad kaga hortegi kartaa dhibaatooyin baddan oo hoygaaga, sidoo kalena kordhin kartaa amniga hoygaaga.

### Amniga dabka

Aad bey muhiim u tahay guri walba inuu leeyahay qalabka dabka ka diga. Inaad ku xirto guriga ka digaha dabka, hubisid iyo inaad bateriyadana badesho waa dastuuri adigeyna waajib kugu tahay. Guryaha cusub iyadoo elektornik ayey ku xiran yihiin.

Howl yar ayaad ku sugi kartaa amniga hoygaaga. Howlaha aad ku qabsaneyso dabka ka taxadar, sidoo kalena qalabka korontadana eed isticmaaleyso u foojignow.

Kuwa soo socda ayaad ka heleysaa xog, taasood ku wanaajin kartid badbaadadda dabka hoygaaga iyo dhismahoo dhan.

### Waxyeyleynta biyaha

Qasaalada maacuunta waxa kaliya rakibi kara xirfadle, si tubooyinka loogu xiro si sax ah.  La xidhiidh maareeyaha dhismaha kahor intaanad keensan qasaalada weelka si aad u hubiso in lagu rakiban karo hoygaaga.

> **Amniga dhismooyinka sato**
>
> - Xil iska saar, inuu guriga kuu yaal qaladka digista dabka oo shaqeynaya
> - Alaab ha uga tegin deerka iyo kadinka hore dhismaha wadada la marayo
> - Hubi in alaabka aad si wanaagsan u xirtey
> - Ha dhigan gaari dhabaha guriga xitaa wakhti yar
> - Xawaaraha gaariga dhin markaad baarkinka iyo barxada guriga soo galeyso.
> - Haddaad aragto in dhismaha wax ka heleysan yihiin isla markiiba nasoo wargeli inaga.

Marnaba ha ka tagin iyadoo daaran qasaalada weelka iyada oon cidi la joogin, haddii kale arrinkaasi waa dayacaad taasoo keeni karta inaadan wax magdhow ah ka helin caymiska had iyo jeerna qasabadaha xir marka aan la isticmaalayn

### Tuugada / furayaasha oo kaa dhuma

Habka ugu fiican ee looga hortago xatooyadu waa inaad ilaaliso furayaasha iyo qufulista albaabada. Marnaba haku dhejin furayaashada ciiwaankaaga ama qol lambarkaaga. Si taxadar leh u dhawr furayaasha gurigaaga lana xidhiidh Adeegga Macmiilka SATO isla markaaba haddii fure kaa dhumo. Ha kaga tagin wax calaamado ah gurigaaga kuwaasi oo muujin kara inaanad guriga joogin.


### Fal denbiyeed

Haddii aad tuhunto in gurigaaga la waxyeeleeyey si fal denbi ah, tus. mukhaadaraad leysugu gudbiyey la xiriir marwalba booliiska.

### Baro sida loo wacdo gargaarka degdega

Ugu foojignow si joogto ah ulana soco siyaabaha wargelinta masiibooyinka, baro sida loo tabiyo marka aad sheegeyso waxa dhacey. Xaalad masiibo markey timaato waaa muhiim inaad wacdo lambarka gargaarka degdega 112, isku day inaad caawiso ruuxa dhiban sidoo kalena gurmadka badbaadaddana inaad kusoo hagto goobta.


HADDAAD ARAGTO MASIIBO DAB, WAC LAMBARKA GARGAARKA DEGDEGA **112**




**Xasuuso amniga korontada**


- Ha ka tegin iyagoo daaran makiinada wax lagu kariyo, foornada, kasaaladaha ama feerada.
- Soo gado qalabka korontada leh astaanta CE.
- Joogto uga nadiifi qalabka elektoroonika boorka.
- Ka demi teleefishinka korontada gebi ahaan.
- Ha isticmaalin qalab koronto ciladeysan.
- Qalabka korontada ee bannaanka yaala ha u isticmaalin guddaha.
- Kawada saar bareeska dhammaan xiliga aad fasax ku maqan tahay.
- Fiilada korontada ha uga tegin iyadoo ka lulato barkinga.
- Dhismooyinka SATO hagaajinta iyo dayactirka korontada waxaa sameyn kara oo keliya xirfad-layaal.

# XOG SIDAAD KU HAGAAJIN LAHEYD AMNIGA DABKA




Xil iska saar inuu guriga kuugu xiran yahay ka digaha dabka. Guryaha cusub iyadoo elektornik ayey ku xiran yihiin dayactirkiisana waxaa ku shaqo leh shirkada dayactirka.

Haddii adigoo hurdaya ay dhacdo masiibo dab, ka digaha dabka wuxuu ku siinayaa wakhti 2–3 daqiiqo ood kaga badbaado gurigaaga gubanaya.




Ku dheji digaha bartamaha saqafka kore guriga, qol walba inta aan ka aheyn (jikada iyo musqusha qubeyska). Halkii dige wuxuu ku filan yahay 60 mitir oo labo jibaaran. Haddii gurigiinuhu yahay dhowr dabaq, ku dheji dabaq walba.

Tijaabi iney shaqeynayaan had iyo goor. Ku darso jadwalkaaga sida maalintaad nadiifineyso guriga inaad isna tijaabiso.




Makiinada raashinka lagu kariyo agagaarkeeda nadiifi, weligaana ha uga tegin intaad wax kor saarto. Haddii gurigaaga carruur ama xayawaan rabaayad ah joogaan, waxaa habboon inaad ku xirto/daboosho badhamada laga shido makiinada kariska iyo foornada daboolka loogu talogaley si khaldan si aan loogu shidan.



Ka taxadar si gaara nalalka sida sahlan u kululaada.

Nalalka dhigo/ku xir meel amni ah, xaqiijin inaad dhigto meel ay dhacayaan sida kuraasta fadhiga iyo sariirta ineysan ku dul dhicin.




Masax sawnada markaad ku sawneysato. Waligaana ha ku keydin alaab dheeriya qolka sawnada, hana ku qalajin dharka. Haddii cilad darteed ay keligeed isdaarto, waxaa suurogal ah iney qatar geliso naftaada haddii halkaas ay ka dhow yihiin waxyaabo dabka u sahlan.



Shumacyada ku shido oo dhig meel amni ah, meel aysan ka dhaceyn. Marna hakaga tegin guriga iyadoo shumac shidan yahay.

Balakoonka laguma shidi karo dab/olol iyo haashka sigaarka ku cabista iyadana halka loo calaamadeeyey dhismaha aad ku nooshahay.

# 6. KA GUURISTA GURYAHA SATO

Haddii aad qorshaynayso inaad u guurto guri cusub, waxaa kula gudboon inaad booqato SATO guryaha kalee ka bannaan. Ka guurista guriga waxay leedahay sharuudo baddan, kuwaasoo u baahan inaad xaliso marka hore intaadan guurin. Liiska waxyaabaha u baahan inaad xasuusnaatid ama tusmo waxaad ka heleysaa sato.fi.

### Ka bixista heshiiska

Xasuuso inaad gudbiso ogaysiiskaaga ka bixista heshiiska SATO. Wargelin la'aan gurigii sidiisii ayuu magacaaga ugu qornaan kiradana adigaa ka masuula, xitaa haddaaad ka guurto gurigii. Wargelinta inaad ka baxeyso heshiiska guriga waxaad ku sameyn kartaa OmaSATO, sato.fi (waa inaad bankigaaga ku gasho) ama aad soo daabacato foomka kabixista heshiiska oo qoraal ah ood soo buuxiso haddii heshiisku labo qofood ku saxiixan yihiin, waa iney labada soo saxiixaan kuna caddeyaan iney heshiiska ka baxayaan.Soo wargeli wakhti hore oo munaasiba markaad hubsato, inaad ka guureyso guriga xiliga heshiis ka bixista waa bil dhameystiran ka hor, waana bishaas kiradeeda inaad bixneyso. Tus. markaad heshiis ka bixista soo ogeysiiso 20.6 masuuliyadii bixinta kirada guriga waxay kaaga ek tahay 31.7.

### Fureyaasha

Waa inaad soo celiso furayaashaada marka hoyga la nadiifiyo oo aanad mar dambe booqanayn hoygaas. Si toos ah ha ugu dhiibin furayaasha ruuxa soo degi doona hoygaas. Waxaad heli doontaa macluumaad aad u faahfaahsan oo kusaabsan soo celinta furayaasha tusmada guurista ood ka heleyso boga SATO.

### Alaabta aad tuureyso

Fadlan xasuusnow in tusmooyinka maaraynta khashinka ee ay tahay inaad raacdo inta aad deggan tahay dhismaha sidoo kale ay tahay inaad u hoggaansanaato markaad guureysid. Waa inaad ka qaaddo wixii khashin halis leh iyo qaybaha alaabaadka ee la tuuray iyo waxyaalaha kale ee waawayn dhismaha una qubto adiga oo raacaya qaynuunada khashinka ee dawladda hoose. Kaliya waxyaalaha ku habboon weelka khashinka ayaa lagaga tagi karaa qolka khashinka.

### Soo celinta carbuunta geediga kadib

Sida xeerku dhigayo, rahmada/deebaajiga la hayo waxa laguu soo celinayaa akoonka aad noosoo qortey bil markey kasoo wareegto xiligii ay kaaga ekeyd masuuliyada bixinta kirada guriga, haddii xiliga aad wareejineysey furaha, gurigu ahaa mid aan waxyeelo aadan ugeysan , wax kira ahna lagugu laheyn.

### Wargelinta geediga

Waa inaad ka baxdaa heshiisyada sawnada, korontada, internetka iyo dhammaan heshiisyada la xiriirey hoyga aad ka guurtey.

Xasuuso inaad si sharciyan ah u wargeliso guuristaada xarunta tirokoobka bulshada dhigitalka ah.



# LIISKA INAAD XASUUSTO NADAAFADA U DANBEYSA

**Waa waajib saaran macmiilka nadiifinta marka uu ka guurayo hoyga si foojigan. Waa inaad hubisaa inta aadabn guurin inaad si wanaagsan aad u nadiifisey waana sida hoos ku qoran qaabka nadaafada u danbeysa loo sameynayo.**

Ogsoonow, in

- Haddii aad nadaafada u danbeysa u sameyn sida lagu farey ama aadanba nadiifin ama aad qeyb ka takto, waxaan kuusoo direynaa kharashka ku baxa shaqada xirfadlaha nadaafada sameeyey gebi ahaanteeda;
- Haddaad alaab kaga takto hoyga, waa la tuurayaa kharashka faaruqinta hoygana adigaa lagugu soo dalacayaa.

### Suuliga, musqusha qubeyska iyo sawnada

- Dhaq fadhiga suuliga, tubooyinka iyo saxanka weji dhaqa.
- Dhaq musqushka qubeyska iyo waaskada.
- Dhaq sawnada, xasuuso sidoo kale albaabka sawnada.
- Nadiifi dhulka iyo bulaacada.

### Jikada

- Masax dhamaan meelaha wax la saaro dushooda iyo weliba qalabka ka nadiifi dufanka iyo waxa ku dhagan, sidoo kalena gudahana ka nadiifi.
- Nadiifi makiinada wax lagu karsado, foornada iyo biraha foornada, sidoo kale xasuuso dhinacyada inaad ka nadiifiso.
- Nadiifi marwaxada hawada ee makiinada dusheeda.
- Dhaq talaajada/fintijeerka oo dhalaali qaboojisadana. Ka huufaree habaaska/boorka talaajada gadaasheeda.
- Haddii hoygaagaSATO yaaley qasaalada maacuunta, u nadiifi si taxadar leh.

### Derbiga iyo dhulka


- Huufaree dhulka, istiraasho yar ku masax derbiyada oo kaga tir wixii ku dhagan.
- Ka nadiifi derbiyada waxa ku yaala iyo hadey sharootooyin ku dhagan yihiin.
- Nadiifi kanaalada hawada ay ka baxdo.
- Tirtir damiye daaraha nalka.
- Tirtir muraayadaha agabka dhalooyinka.

### Daaqadaha iyo albaabaadka

- Dhaq daaqadaha, haddii ay aad u wasaqeysan yihiin.
- Nadiifi albaabaadka iyo gaanjooyinkooda.

### Goobaha kale

- Faaruqi oo nadiifi qolka dharka iyo armaajooyinkaba.
- Hagaaji oo faaruqi balakoonka iyo baqaarka alaabta.



### Dhalaalinta iyo nadiifinta talaagada iyo qaboojiyaha

U foojignow dhalaalinta qaboojisada qalajina barafka dhalaaley markiiba, si uusan dhulka u qoyn Ka bixi bareyska kadibna albaabka talaagada balaq.

Qaboojisada aan la dhalaalin, waxay keeni kartaa fatahaad ama waxyeelo qoyaan, haddaan qof markaas soo dageyn. markiiba heshiiska korontadana ka bax.

## Xeerarka guud iyo qawaaniinta dhismaayasha sato

Ujeedda niddaamkan waa sidii lagu horumarin lahaa dhammaan dadka kunool dhismayaasha SATO sidey ugu dareemi lahaayeen hoygooda amni iyo nasteexo. Jawiga dhismaha iyo bilicsanaantu waxay qeyb muhiima ka tahay iney si wadajira dadka degen u helaan nolol iyo deris wanaag. Ahow deris wanaagsan, marka aad ku sugan tahay hoygaaga. Sidoo kale tixgeli markaad ku sugan tahay goobaha la wadaago iyo barxada dhismahaba deriskaaga. Macno daro ha dulmin deriskaaga inaad ku buuqdo wakhtiga degenaansha dhismaha.

Waa waajib saran deggane kastaa inuu barto Xeerarkan iyo Qawaaniintan, kuna dhaqmaa oo hubiyaa in xubnaha qoyskiisa iyo martiduba sidoo kale ay ku dhaqamaan Iyo inaad adigu leedahay masuuliyadeeda.

Xeerarkan iyo Qawaaniintan waxaa dheer in heshiisku sida sharciga waafaqsan dhisamaha iyo bannaanka guriga sida ku cad heshiiska kireynta guriga uu yahay in loo hoggaansanaado.

### Buuq la'aanta habeenkii

Dhismaayasha SATO, xiliga buuq la'aanta waa inta u dhaxeysa saacada 22–07, waa tobonka fiidnimo ilaa todobada arroornimo.

### Meelaha la wadaago

Albaabada dibadda waa in lagu ilaaliyo qufulnaan saacadaha lagu heshiiyey, sida badan inta u dhaxaysa 21:00 iyo 7:00. Kuwa maraya albaabada qufulan waa inay hubiyaan inuu albaabkii is xirey marka ay dhaafaan. Buuq lama oggola meelaha la wadaago., macno la'aana looma joogi karo in lagu cabo sigaar- waa ka mamnuuc gudaha. Badbaadada dabka dartii, waxba waa inaan la dhigin meel aan ahayn meelaha loogu talogalay. Waxba waa in la dhigin jaranjarooyinka iyo marinka albaabka .Sida rooga yar ee albaabadka la dhigo, faanka carruurta, baaskiilada iwm. Sidoo kale u hoggaansanow xeerka badbaadadda dabka inaadan ku keydin karin waxyaabaa u sahaln ololka ama dhalin kara dab. Meelaha la wadaago, sida qolalka kaydinta qalabka dibadda iyo dharmaydhka iyo qolalka qalajinta, waxa kaliya loogu talogalay isticmaalka dadka kunool oo kaliya.

Calaamadaha iyo xayeysiisyada waxa kaliya lagu dhejin karaa haddii ay oggolaato shirkadda guryaha ee SATO.

### Guryaha

Jaarka ma aha in la arbusho. Buuqa iyo wixii arbush leh waa in laga dheeraado gaar ahaan inta u dhaxaysa saacada 22:00 –¬7:00. Balakoonada dhismaha ama goobaha kalee shirkada marnaba lagama sameyn karo buuq, gariir, ur ama wax la dhibsado, taasoo arbush joogto ku ah aan fiicneyn deriska. Hoygaaga waa in si fiican loo daryeelo. Hoyga loo laydhin maayo iyada oo albaabka loo furayo jaranjarada. Bulaacadaha iyo musqushaba haku shubin dufanka raashinka ama khashin awdi kara, taasoo waxyeeleen karta bulaacadaha.

### Balakoonka / Deyrka / barxada guriga

Deganaha hoyga waa inay sidoo kale ilaaliyaan nadaafada baalkoonkooda oo ka qaadaan barafka . Balakoonkaaga waad duban/solan kartaa oo keliya markaad isticmaaleyso hogeeyaha eloktoroonika ah amniga dabka iyo deriskaaga daraadeed. Weelasha ubaxa la surto waa iney balakoonkaaga dhanka gudaha soo xigaan. Balakoonka ma aha inaad dhigto alaabo muuqaalka iyo deriskaba u xun sidoo kalena balakoonka waxba kama tuuri kartid sida haashtariga iyo alaabada kale. Anteenooyinka, aariyeelada, iwm., waa inaan la rakibin ilaa shirkadda gurigu oggolaato.

### Sigaar cabis

Ku cabista sigaarka waa ka mamnuuc qolalka guddahooda iyo meelaha ka dhaxeysa dadka sidoo kale waa ka mamnuuc balakoonka dadka kadhaxeeya iyo meelaha carruurtu ku ciyaaraan. Haashtariigana waa in lagu rido weelka loogu talogaley.

Guryaha ay mamnooca ka yihiin ku cabista sigaarka xitaa laguma cabi karo balakoonkooda. Sigaarka waxaa lagu cabi karaa oo keliya goobaha loocayimey, waa haddii meel gaara loocayimey in lagu cabo sigaarka.

### Bannaanka

Illaali bilicda bey'ada barxada, Ubaxyada iyo jardiinooyinka iyo agabka barxada iyo qalabka carruurta ku ciyaaraan ma aha in la waxyeeleeyo. Qadari oo u hoogaansanow xiliga buuq la'aanta bannaanka gurigayaha SATO.

### Maaraynta khashinka

Khashinka guriga iyo khashinka kale waa in lagu cabbeeyaa oo la dhigaa weelka khashinka. Khashinka waa in la kala sooco sida waafaqsan niddaamka. Deggayaashu waa inay taxadaraan qaadista khashinka aan ahayn khashinka guriga (sida agabka duqobey) oo dhismuhu leeyahay. Wixii kharash dheeraad ah ee

ku yimaada shirkadda guryaha oo ka dhasha waxay kusoo dalcan macmiilka.

Jabinta qawaaniinta khashinka waxa lagu soo dallici doonaa degganaha sababta u ah. Xadgudubyada noocan ah waxa kamid ah kaga tagista agabka ama khashinka halista ah qolka khashinka, ku keenista nidaam darri qolka khashinka, burburinta iyo hawsha kale ee aan habboonayn. Khashinka halista ah ee bey'eed waa in la geeyaa meesha loogu talogalay ee ay sameeyeen hay'adaha maaraynta khashinka.

### Baarkinka

Baarkinka gaadiidka waxa looga baahan yahay oggolaansho inuu ka heysto shirkadda guryaha waxaana kaliya la oggol yahay barxadaha sida gaarka ah loogu calaamadiyey. Looma ogola barxada guriga hortiisa in gaari lagu wado hadeysan markaa daruuri aheyn, haddey daruuri tahayna waa inaad ku socotaa xawaare aad u hooseeya. In gaari iska daaran taagnaado ama la dhigto gaari dhabaha gaaddiidka gurmadka degdega waa mamnuuc.

Barxadaha baarkinka booqdaha waxa loogu talogalay isticmaal kumeelgaar ah ee martida degganayaasha – maya baabuur-dhigashada joogto ah ee gaadiidka degganaha. Barxadaha baarkinka waxa kaliya loo isticmaali karaa dhigashada gaadiidka shatiga u haysta.

Fiilada korontaa ee baarkinka bareyska iyadoo ka taagan loogama teki karo.

### Jafitaanka/hurgufida

Roogaga iyo gogosha jafitaankeeda waxay shirkadu u sameysey meel gaara oo loogu talogaley, Birta rooga lagu jafo. Dharka iyo foodarayaasha jafistooda ama inaad warato oo ku qalalsato dhar aan badneyn balakoonka hoygaaga waa la ogol yahay, waa haddii xariga aad wax ku wareyso yahay guddaha balakoonka, iyo meelaha gaarka ee dhismaha loogu talo galey in wax lagu warto.

### Xayawaanka rabaayada ah

Rabaayadaha waa in had iyo jeer lagu hayaa xadhig marka dibadda dhismaha ama barxadaha guryaha gaarka loo leeyahay. Rabaayaduhu ma aha inay ku keenaan arbush degganayaasha ama kuwa u haysta ogollaansha iney dhismaha ku sugnaadaan, Rabaayada waa in banaanka dhismaha looga bixiyaa markey la saxaro iyo kaa di geynayo. Rabaayada iyadoon cidna la socon wey ka rabeen tahay joogista barxada guriga iyo goobaha ciyaalku ku ciyaaraan iyo nawaaxigeeda.. Degganayaashu waa inay hubiyaan buuqa rabaayadda (sida ciyda eyga) inayna si joogto ah oo aan macquul ahayn u arbushaan jaarka.

### Waajibaadka ogaysiinta ee degganaha

Shirkadda SATO Waa in lagu wargeliyaa isla markaaba wixii cilad ah ee lagu arko dhismaha ama hoyga, sida fatahaad biyo ama waxyeelo qasabad ama xadhig. Maddaxa adeega/wakiilka guriga Sidoo kale waxa la rajaynayaa in degganayaashu ku wargeliyaan SATO qoraal ahaan wixii burburin ama xadgudub lagu sameeyey Xeerarkan iyo Qawaaniintan ee la arkay. Maddaxa adeega/wakiilka guriga waa in lagu wargeliyaa wixii shaqo isbeddel ah ama dayactir hoyga ka jirta. Jaarka waa in la sii ogaysiiyo wixii shaqo keeni karta buuq ama arbush Maddaxa adeega/wakiilka guriga waana in dadaal loo galaa in shaqooyinka noocan ah la qabto maalmaha shaqada kahor saacada 21-ka.

### Ogaysiinta guurista

Xogta macmiilka iyo habeynta hoyga laga guurayo iyo midka loosoo guurayaba waa in la ogeysiiyaa markiiba kireyaha guriga ama shirkada dayactirka iyo inaad iska diiwaangeliso deggaanka waaxda diiwaangelinta dadweynaha (maistraatti).

### Jabinta xeerarkan iyo qawaaniinta

Jabinta Xeerarkan iyo Qawaaniintan waxay keeni karaan masuuliyadda bixinta kharashka waxyeelada, la wareegista abaarmenka ama burinta heshiiska kirada. Hawsha dambiilenimo ama hawl kale oon sharci darro ah, sida dambiyada dhismaha, ee la xidhiidha degganaanshaha dhismaha waxay keeni doonaan tallaabooyin la xidhiidha sii wadista kirada waxayna keeni karaan qaadista masuuliyadda bixinta kharshka waxyeelada timaad.

### Wax ka badelka xeerka

Gudiga xaafada ee hoygaaga ama shirkada guryaha ayaa wax ka badeli karta xeererkan ama u dejin kara xeerar kale oo u gaar ah. Laakiin marnaba ma aha in dhisme xeerkiisu burinayo sharciga ama uu khilaafayo heshiiskii kirada guriga iyo inuu ahaado mid ay dadka ku nool oo dhan arki karaan.

### Dhismaha haddey ku yaalaan guryo kale oon SATO laheyn

Waxaa laga yaabaa dhismaha aad ku nooshahay iney ku yaalaan guryo aysan SATO laheyn, markaasna ay wixii macluumaad ah oo dhismahaas ay qaabilsan tahay shirkad kale. Haddii aad rabto inaad nagala hadasho xeerarka ama aad rabto inaad nagu soo wargeliso denbi, xogta cusub waxaad ka heleysaa boorka ogeysiiska ee albaabka dhismaha laga soo galo.

## Lifaaqa 2
## Shaxda qaybsiga masuuliyadda ee guryaha kirada ah ee sato

| | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya SATO | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya DEGGANAHA | Macluumaad dheeraad ah |
|---|---|---|---|
| **Qaabdhismeedyada iyo nidaamyada** | | | |
| Qaabdhismeedyada saqafka dibadeed | ● | | |
| Saqafka, dabaqa dhulka iyo dabaqa dhexe | ● | | |
| Qaab culayska qaada | ● | | |
| Dibadda xagga hore | ● | | |
| Qaabdhismeedyada gidaarka gudaha | ● | | |
| Hawo-siinta dabaqa dhulka | ● | | |
| Dureeriyayaasha French iyo ceelashada bullaacadda | ● | | |
| baalkooniyada | ● | | |
| Nidaamyada HPAC ee dibadda abaarmenada | ● | | |
| **Furayaasha, qufulada** | | | |
| Dayactirka qufulka asalka ah | ● | | |
| Gadashada furayaal dheeraad ah | | ● | Furayaasha dheeraadka ah waxa lagaga dalban karaa onlayn www.sato.fi |
| Rakibista iyo dayactirka qufulka ammaanka sare ama elektarooniga ah | | ● | Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. Waa in lagaga tago abaarmenka iyada ooyna jirin wax magdhaw gaar ah marka guurista. |
| Dib macluumaad u galinta albaabka hore ee abaarmenka | | ● | Waa in hore uu u sii oggolaadaa maareeyaha dhismuhu. Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. Furayaasha oo dhan waa in la soo celiyo iyada ooyna jirin wax magdhaw gaar ah marka guurista. |
| **Albaabada hore ee abaarmenka** | | | |
| Xaydhaynta hinjiyada iyo qufulka asalka ah | | ● | |
| Dayactirka moorka iyo beddelista | ● | | |
| Dayactirka albaabka iyo farnijarka albaabka asalka ah | ● | | |
| Rakibista iyo dayactirka silsilada albaabka, kuuska badbaadada hinjiga ama daloolka albaabka | | ● | Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. Waa in lagaga tago abaarmenka iyada ooyna jirin wax magdhaw gaar ah marka guurista. |
| **Daaqadaha iyo albaabada dibadda ee baalkooniyada** | | | |
| Dayactirka moorka iyo beddelista | ● | | |
| Dayactirka fadhiga iyo dheeraynta | ● | | |
| Beddelista quraaradda daaqadda | ● | | |
| Arag-ma-gudbiyaha Venetian, soo gatay degganuhu | | ● | Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. Waa in lagaga tago abaarmenka iyada ooyna jirin wax magdhaw gaar ah marka guurista. |
| Arag-ma-gudbiyaha Venetian, bixiyey SATO | ● | | |
| Rakibista iyo dayactirka quraaradaha baalkooniyada, muraayadaha degganuhu soo gatay | | ● | Waa in hore uu u sii oggolaadaa maareeyaha dhismuhu. Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. Waa in lagaga tago abaarmenka iyada ooyna jirin wax magdhaw gaar ah marka guurista. |
| Rakibista iyo dayactirka quraaradaha baalkooniyada, muraayadaha SATO bixisay | ● | | |
| Albaabada dibadda baalkooniyada | ● | | |
| Nadiifinta muraayadaha gashan daaqadaha iyo baalkooniyada | | ● | |

| | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya SATO | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya DEGGANAHA | Macluumaad dheeraad ah |
|---|---|---|---|
| **Gidaarka, siliiga iyo oogooyinka dhulka abaarmenka** | | | |
| Nadiifinta oogada gidaarka, siliiga iyo | | ● | |
| Ranjiyeynta gidaarka iyo waraaqo ku xidhista gidaarka | ● | | |
| Dayactirka iyo beddelista oogada qolka qoyan | ● | | |
| La socoshada xaaladda oogada qolka qoyan | | ● | |
| Dayactirka daboolka qolka uumiga | ● | | |
| Ranjiyeynta siliiga | ● | | |
| Dayactirka iyo beddelista dahaadhka dhulka | ● | | |
| Nadiifinta baalkooniyada iyo qaadista barafka | | ● | |
| Nadiifinta godka bullaacadda biyaha baalkooniga | | ● | |
| Dayactirka oogada baalkooniga | ● | | |
| **Fadhiyada armaamooyinka gidaarka ku dheggan ee abaarmenka** | | | |
| Dayactirka ama beddelista fadhiyada | ● | | |
| Furista iyo rakibista armaashada mishiinka dhaqa | | ● | |
| Dayactirka ama beddelista kursiga qolka uumiga ee abaarmenka | ● | | |
| **Kululaynta** | | | |
| Hawo ka qaadista kululeeyaha | ● | | |
| Habaynta aasaasiga ah ee kululeeyaha | ● | | |
| Dayactirka khanka kululeeyaha | ● | | |
| Nadiifinta kululeeyaha | | ● | |
| Nidaamyada kululaynta ee qaabdhis-meedyada dhexdeeda | ● | | |
| **Hawo-siinta** | | | |
| Nadiifinta khanka hawo saarista | | ● | |
| Habaynta iyo dayactirka khanka hawo saarista | ● | | |
| Nadiifinta dhuunta hawo-siinta | ● | | |
| Nadiifinta khanka hawo qaadashada iyo shaandhada | | ● | |
| Gadashada iyo beddelista shaandhooyinka cusub ee hawo qaadashada | ● | | |
| Nadiifinta marawaxadda saaraha/shaand-hada daboolka dufanka ee madbakha | | ● | |
| Gadashada iyo rakibista marawaxadda saaraha/shaandhada daboolka dufanka cusub ee madbakha | | ● | |
| Dayactirka marawaxadda saaraha/ da-boolka ee madbakha | ● | | |
| Nadiifinta shaandhada qolka hawo-siinta abaarmenku leeyahay ama gadashada iyo rakibista shaandh cusub | ● | | |
| Dayactirka qolka hawo-siinta abaarmenku leeyahay | ● | | |
| Habaynta qolka hawo-siinta abaarmenku leeyahay | ● | | |

| | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya SATO | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya DEGGANAHA | Macluumaad dheeraad ah |
|---|---|---|---|
| **Qalabka biyo-galinta iyo nadaafadda** | | | |
| Nadiifinta eereytarka qasabadda | | ● | |
| Habaynta aasaasiga ee socodka qasabadda | ● | | |
| Beddelista tuumbada qubayska iyo qubayska gacanta | ● | | |
| Dayactirka iyo beddelista qasabadda | ● | | |
| Dayactirka fadhiga suuliga | ● | | |
| Dayactirka mashiinka weelka dhaqa, mishiinka degganuhu soo gatay | | ● | Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. |
| Dayactirka mashiinka weelka dhaqa, mishiinka SATO bixisay | ● | | |
| Rakibista mashiinka weelka dhaqa, mishiinka degganuhu soo gatay | | ● | Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. |
| Rakibista mashiinka weelka dhaqa, mishiinka, mishiin SATO bixisay | ● | | |
| Rakibista fiishta dabka mashiinka weelka dhaqa, mishiinka degganuhu soo gatay | | ● | |
| Rakibista qasabadda mashiinka weelka dhaqa, mishiinka degganuhu soo gatay | | ● | Waa in hore uu u sii oggolaadaa maareeyaha dhismuhu. Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. |
| Rakibista qasabadda mashiinka weelka dhaqa, mishiinka SATO bixisay | ● | | |
| La socoshada iyo nadiifinta dabinka dureershaha | | ● | |
| Daryeelista iyo hagaajinta dureershaha | ● | | |
| La socodka iyo nadiifinta dureershaha dhulka/sagxadda | | ● | |
| Dayactirka dureershaha dhulka | ● | | |
| Dayactirka beebabka biyo-galinta iyo nadaafadda | ● | | |
| La socodka sii daynta biyaha ee qasabadda iyo suuliga | | ● | Shirkadda dayactirka waa in loo sheego sida ugu dhakhsaha badan sii daynta biyaha. |
| Akhriska saacadda biyaha ee abaarmenku leeyahay | | ● | Haddii SATO si gaar u codsato. Saacaha biyaha waxa akhriya degganayaasha dhismayaal cayiman oo kaliya |
| Biyo kululeeyaha | ● | | |
| **Qalabka koronto ee abaarmenku leeyahay** | | | |
| Gadashada iyo beddelista guluubyada laydhka iyo laambadaha faloorisanka | | ● | |
| Gadashada iyo beddelista shidayaasha laambadaha faloorisanka | | ● | |
| Dayactirka fadhiga laydhka sugan iyo baahiyaha fadhiga laydhka | ● | | |
| Gadashada iyo beddelista fuyuusyada | | ● | |
| Dayactirka godka fiishta gidaarka iyo iswijka | ● | | |
| Rakibista fadhiga laydhka guriga | | ● | |
| Gadashada iyo dayactirka xadhiga xidhiidhiyaha aariyaalka | ● | | |
| Rakibista xadhiga taleefanka, xogta, iyo aariyaalka iyo fareemka dheeraynta oo dheeraad ah | | ● | Waa in hore uu u sii oggolaadaa maareeyaha dhismuhu. Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. |
| Rakibista saxanka santalaytka | | ● | Waa in hore uu u sii oggolaadaa maareeyaha dhismuhu. Shaqada waxa kaliya fulin kara xirfadle ama iibiye takhasus u leh. |

| | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya SATO | Ka masuul noqonayada oo lacag ku bixinaya DEGGANAHA | Macluumaad dheeraad ah |
|---|---|---|---|
| **QALABKA IYO AALADAHA ABAARMEN-KU LEEYAHAY** | | | |
| Gadashada iyo beddelista beetariga | | ● | |
| Dayactirka kululeeyaha qolka uumiga | ● | | |
| Gadashada iyo beddelista dhagaxaha kululeeyaha qolka uumiga | | ● | |
| Baraf-ka-dhalaalinta qaboojiyaha marka laga maarmi waayo | | ● | |
| Nadiifinta qaboojiyaha, girgiraha iyo moo-fada gudaha iyo dibadda | | ● | |
| Gadashada iyo dayactirka qiiq-uriyaha beetariyada ku shaqeeya | | ● | |
| Gadashada iyo dayactirka qiiq-uriyaha korontada ku xidhiidhdsan | ● | | |
| Dayactirka girgiraha, moofada iyo qaboo-jiyaha | ● | | |
| **Dibadaha** | | | |
| Qaabdhismeedyada oogada | ● | | |
| Meelaha dhirta leh | ● | | |
| Farnijarka iyo qalabka | ● | | |
| Xayndaabyada laydhka | ● | | |
| Qalabka ciyaarta | ● | | |
| Xayndaabyada culus | ● | | |
| **Meelaha lawadaago** | | | |
| Dhismayaasha dibadda | ● | | |
| Qalabka iyo agabka HVAC iyo koronto | ● | | |
| Nidaamyada HVAC iyo koronto | ● | | |
| Qalabka iyo agabka | ● | | |
| **Gabbaadka difaaca rayidka** | | | |
| Qalabka iyo agabka sharciyeed | ● | | |
| Agab dheeraad ah, sida kiniinka ayodhiinta | ● | | |
| **Beeraha gaarka ah ee abaarmenku leeyahay** | | | |
| Meesha loogu talogalay isticmaalka gaarka ah ee degganaha | | ● | Degganaha ayaa ka masuul ah hawlaha ay kamid yihiin joog-taynta nidaamka, qaadista barafka iyo xiirista daaqa beerta gaarka ee abaarmenku leeyahay. |
| **Wax kale** | | | |
| Samaysiga caymiska guriga | | ● | |

Haddii degganuhu sababo waxyeelo oo waxyeeladuna ayna ahayn rifanka iyo lisanka caadiga ah, SATO waxay ku soo dallici kharashka waxyeelada degganaha iyada oo raacaysa Liiska Lacagaha Lagu Dallaco Macmiilka ama kharashka dhabta, oo ay kujiraan arrimaha masuuliyadda dayactirka SATO leedahay. Haddii aad heshay tilmaamo faahfaahsan ama tilmaamo ka duwan shaxda sare ee SATO ama wakiilka SATO, fadlan raac tilmaamahaas.

Daabace: SATO, PL 401, 00601 Helsinki
sato.fi
p. 020 334 443

3/2022